

# SIDA LOO CODEEYO



*Codka aad bixinaysaa waa codkaaga—isdiiwaangeli, war hel, soco oo coday!*

## YAA CODAYN KARA?

Si aad Minnesota uga codayso, waa in aad tahay muwaadin Maraykan ah, ugu yaraan jira 18 sano Maalinta Doorashada, aadna deganayd Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.

Haddii dembi culus lagugu xukumay, waad codayn kartaa ka dib markaad dhammaysato dhammaan qaybaha xukunkaaga, oo ay ka mid yihiin tijaabo dembiile, siidayn waqtigii oo aan la gaarin, ama shuruudo kale sida magdhaw.

Waad codayn kartaa adigoo wali hoos jooga/kaa mas'uul yahay, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.

## ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Waa in aad ka diiwaangashan tahay cinwaankaaga hadda si aad u codayso. Si aad isu diiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax uga beddesho, tag [vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov).

Sidoo kale waxaad iska diiwaangelin kartaa meesha doorashadu ka dhacayso ee deegaankaaga Maalinta Doorashada. Waa in aad tustaa caddayn ah magacaaga iyo cinwaankaaga hadda. Wixii faahfaahin ah, booqo [vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov) ama wac 1-877-600-VOTE.

*waa socotaa eeg bogga gadaale...*

## TAARIIKHAHA 2016

**DOORASHADA AASAASIGA**  
Talaada, 9ka Bisha 8aad (August)

**MAQNAANSHO KU CODAY**  
Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 23ka Bisha 9aad (September) ilaa 7da Bisha 11aad (November).

**ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO**  
Hory isudiiwaangeli ugu dambayn 18ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada.

**MAALINTA DOORASHADA**  
Talaada, 8da Bisha 11aad (November)

# SIDA LOO CODEEYO



...ka imid horay

## ARAG TUSAALE AH WARQADDAADA CODBIXINTA

Si aad u aragtid musharixiinta iyo su'aalaha ku qornaan doona warqaddaada codbixinta, booqo [vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov).

## GOOBAHA IYO SAACADAHA CODBIXINTA

Si aad u hesho meesha aad ka codbixinayso, booqo [vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov). Goobaha codbixinta badankoodu waxay furan yihiin laga bilaabo 7da subaxnimo ilaa 8da fiidnimo.

## WAXA AAD SOO QAADANAYSO

Haddii aad ka diiwaangashan tahay in aad ka codayso cinwaankaaga hadda, uma baahnid in aad la timaadid aqoonsi. Haddii aad u baahan tahay in aad isdiiwaangeliso ama diiwaangelintadii hore wax ka beddeshid, waad u baahan doontaa in aad tusto caddayn degaanaanshahaaga ah intaadan codayn. Haddii aad rabto in aad ogaato wax intaa ka badan, booqo [vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov) ama wac 1-877-600-VOTE.

## HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA

Horay ayaad uga codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo Jimce 23ka Bisha 9aad (September). Waxaad kaloo codsan kartaa in boosta laguugu soo diro warqadda codbixinta maqanaha. Si aad u heshid xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama aad u codsatid warqadda codbixinta maqanaha, booqo [vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov).

### SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO

Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso, adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.